



Allaha nafta Maxamed gacantiisa ku jirtaan ku dhaartee qofka i maqla ee ummaddaan ka mid ah yahuudi ama nasraani-kuu doonaba ha ahaadee-, ee dhinta isagoon rumayn xaqa la ila soo diray wuxuu ahaanayaa kuwa naarta gala

Abii Hureyra -Allaha ka raali ahaadee-wuxuu Rasuulka -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- ka wariyey inuu yiri: "Allaha nafta Maxamed gacantiisa ku jirtaan ku dhaartee qofka i maqla ee ummaddaan ka mid ah yahuudi ama nasraani-kuu doonaba ha ahaadee-, ee dhinta isagoon rumayn xaqa la ila soo diray wuxuu ahaanayaa kuwa naarta gala".

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Nabigu-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuu ku dhaartay qofka maqla Nabiga scw oo dacwada Islaamku gaadho, yahuudi iyo kiristaan ama qayrkoodba ha ahaadee, ee dhinta isagoon Islaamin, inuu ahaanayo mid naarta gala oo ku waaraya waligiiba.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/3272>

